

# Jirrada Cytomegalovirus (CMV)

Taariikhda:

Gacaliye Waalid ama Wakiil,

Ilmahaagu wuxuu la kulmay **jirrada Cytomegalovirus** intuu joogay xanaanada ilmaha.

## **Maxay tahay CMV?**

CMV waa xanuun hargab oo kale oo u badan ilmaha yaryar.

## **Waa maxay calaamadaha xanuunka CMV?**

Badi dadka qaba CMV ma laha calaamooyin. Dadka qaar ayaa isku arka qandho, dhuun xanuun, daal iyo qanjidh barar. Dadka qaba CMV wuxu jidhkoodi sameeyaa talaal fayraskaas ah oo aanay badi mar wax ka badan qaadin.

## **Intee ayey gaadhsiisan tahay ba'naanta xanuunka CMV?**

CMV badi ma waxyeelayso ilmaha qaada. Dadka tamarta iska-caabinta jirradu ku yar tahay, hase ahaatee, ayey CMV halis u tahay oo waa in takhtar loo geeyo. CMV waxa kale oo ay dhibaato ku keeni kartaa uur-ku-jirta muddada uurka. Dumarka uurka leh ee la kulma CMV waa inat takhtar u tagaan.

## **Siduu qofku u qaadi karaa xanuunka CMV?**

CMV waxay ku faaftaa dheecaanka jidhka sida candhuufta, kaadida iyo dhiiga.

## **Goorma ayaa qofka qaba xanuunka CMV uu cid qaadsiin karaa?**

dadka qaba CMV waa laga qaadi karaa inta fayrasku ku jiro dheecaanka jidhkooda, oo noqon karta bilo.

## **Sideen u gargaari karaa kahortaga faafitaanka xanuunka CMV?**

- Gacmaha si fiican u dhaq oo ku dhaq saabuun iyo biyo, gaar ahaan bedelida xafaayada ama isticmaalka musqusha.
- Dabool hindhisada iyo qufaca oo ku rid xaashida xashiishka.
- Nadiifi, dhaqdhaq, oo jeermiska ka-dil alaabta caruurto ku ciyaarto ee xanaanada ilmaha kadib taabashada candhuuf.
- Iska-jir wadaaga cuntada, cabbitaanka iyo alaabta qof ahaaneed ee afku taaban karo sida qalabka cuntada lagu cuno, cadayga ama tuwaalada.
- Iska-jir af ka dhunkashada afka qofka qaba.

Haddii aad uur leedahay, kala hadal CMV takhtarkaaga.

## **Maxay tahay daawada xanuunka CMV?**

Ilmaha fayyo qaba iyo qofka weyni wa ka bogsadaan CMV bilaa dhibaato loomana baahna daawo. Daawada CMV waxa badi u baahda keliya dadka ay liidato tamartooda iska-caabinta jirradu.

## **Haddii ilmahaygu qaado xanuunka CMV, inuu ka joogo miyaa xanaanada ilamaha?**

may, mar haddii aan u ilmuhu qabin calaamooyin u baahan in laga saaro.

